

Warbixin waalidka ku socota oo ku saabsan Ra'yi baarista waalidka ee xannaanada carruurta

Waa maxay ujeeddada laga leeyahay Ra'yi baarista waalidka ee xannaanada carruurta?

Ra'yi baarista waalidka ee xannaanada carruurta waxay waalid ahaan ku siinaysaa fursad aad fikraddaada uga dhiibato sida aad u aragto dhigashada xannaanada carruurta iyo sida ay ilmuhu uga helaan xannaanada carruurta. Natiijada ra'yi baarista waxaa isticmaali doona xannaanada carruurta, mulkiilaha xannaanada carruurta iyo hay'adaha waxbarashada ee dawladda ayaga oo u isticmaali doona falanqaynta iyo horummarinta tayada xannaanada carruurta.

Natiijada ka soo baxda ra'yi baarista waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa cilmibaaris, tirakoob iyo in lagu kaydiyo arkiifiyaha.

Agaasinka waxbarashadu wuxuu tirakoobka ra'yi baarista soo dhigi doonaa bogagga www.udir.no iyo www.barnehaagefakta.no.

Sidee ayaa loo qabanayaa Ra'yi baarista waalidka?

Xor ayaa loo yahay in ra'yi baarista laga jawaabo iyo in kale. Waadna ka boodi kartaa su'aalaha aadan doonayn in aad ka jawaabto.

Mas'uuliyadda maaraynta iyo ilaalinta macluumaadka qofka

Agaasinka waxbarashada ayaa mas'uul ka ah in macluumaadka meelaha lagaala soo xiriirayo iyo jawaabahaaga in loo xafido si waafaqsan xeerarka ilaalinta macluumaadka qofka. Conexus oo mas'uul nooga ah maaraynta macluumaadka ayaa xagga sancada baaritaanka u qaabbilsan Agaasinka waxbarashada, isla xeerarkaas ayayna raacayaan.

Mark aad jawaabayso ma dhiibaysid magac, jawaabahaagana lama socdo lambar dhalasho. Sidaas darteed way adag tahay in la garto qofka iyo waxa uu ku jawaabay ra'yi baarista. Marar aan badnayn (tusaale ahaan xannaanooyinka carruuraha ee yar), ayay dhici kartaa in uu qofi garto qofka jawaabaha bixiyay. Agaasinka waxbarashada waxaa taas darteed ka yaalla xeerar aad u adag in natiijada ra'yi baarista la tuso xannaanada carruurta, mulkiilaha xannaanada carruurta iyo mas'uuliyiinta waxbarashada ee dawladda. Natiijooyinka ra'yi baarista loo daabici maayo hab lagu garan karo jawaabahaaga. Jawaabaha waxaa la haynayaa ilaa iyo intii loo baahdo.

Mararka uu Agaasinka waxbarashadu jawaabaha dhiibo si cilmibaaris loogu sameeyo, waa in ay cilmibaarayaashu raacaan xeerarka agaasinka ee ka yaalla maaraynta macluumaadka iyo waajibka xog qarinta, waana in ay saxiixaan caddayn xog qarintan.

Gundhigga qaanuunka ee maaraynta macluumaadka qofka

Marka aad ka jawaabto Ra'yi baarista waalidka ee xannaanada carruurta waxaad oggolaatay in aad ra'yi baarista ka qaybqaadato iyo in jawaabahaaga loo isticmaali karo falanqaynta iyo sare u qaadidda tayada xannaanada carruurta. Gundhigga qaanuuniga ah ee arrintan waa xeerka ilaalinta macluumaadka qofka qodobka 6-aad lambarka 1-aad xarafka a iyo qodobka 9-aad lambarka 2-aad xarafka a.

Oggolaashada waad la noqon kartaa ilaa iyo inta ay ka dhammaanayso muddada ra'yi baaristu. Oggolaashada oo lala noqdo saamayn kuma yeelanayso sharci ahaanshaha waxyaalaha markaas ka hor la qabtay. Markay dhammaato muddada ra'yi baaristu ayaa la

kala goynayaa isku xirnaantii furihii aad kombiyuutarka ku gelaysay/linkigaagii iyo jawaabahaagii. Taas oo keenaysa in aysan suurtaggal ahayn in aad oggolaashada la noqoto, in aad dalbato in aad jawaabaha aragto, in aad jawaabaha saxdo ama tirtirto, maxaa yeelay jawaabahaagii markaan ma aha kuwo la garan karo in ay adiga kaa yimaadeen.

Gundhigga qaanuuniga ah ee cilmibaarista, tirakoobka iyo gelinta arkiifiyada waa xeerka ilaalinta macluumaadka qofka qodobka 6-aad lambarka 1-aad xarafka e iyo qodobka 9-aad lambarka 2-aad xarafka j. Qodobbada §§ 8 iyo 9 ee Xeerka macluumaadka qofka ayaa ah qaanuunka waddanka ee xoojinaya

Haddii aad wax su'aal ah qabto

Warbixin intaan ka badan waxaad ka heli kartaa xannaanadaada carruurta ama Agaasinka waxbarashada.

Sida loo xiriiri karo Agaasinka waxbarashada:

Teleefoon: +47 23 30 12 00

limayl: post@udir.no

Internet: www.udir.no

Waxaad sidoo kale warbixin badan ka helaysaa www.udir.no/undersokelser. Su'aalaha la xiriira ilaalinta macluumaadka qofka waxaa lagu aaddin karaa ilaaliyaha macluumaadka qofka ee Agaasinka waxbarashada, oo loogu dirayo: personvernombud@udir.no .

Hay'adda ilaalinta macluumaadka [Datatilsynet] ayaa looga cabanayaa maaraynta macluumaadka qofka ee Ra'yi baarista xannaanada carruurta. Waxaad warbixin intaan ka badan ka helaysaa:

<https://www.datatilsynet.no/om-datatilsynet/kontakt-oss/klage-til-datatilsynet/>